## Casriyeynta Dugsiga Sare ee Leodis V. McDaniel

**Su'aalaha Badanka la Isweydiiyo**

Dib loo eegay Maarso 2021

**Waa maxay sababta Madison/McDaniel loo casriyeynayaa?**

Casriyeynta dhammaystiran waxay wax ka qabataa dhammaan nidaamyada daalay waxayna si wayn u casriyeysaa dugsi iyadoo abuuraysa jawi caafimaad leh oo adkaysi badan oo waxbarasho. Dugsiga sida dhammaystiran loo casriyeeyey waxa laga helaa nidaamyo dhisme oo waxtarkoodu sarreeyo; qurxino gudaha ah oo waaraya, nadiif ah oo la joogtayn karo; fasalo iyo barxado dadwayne oo ifaya oo caafimaad qaba: oo ah mid si buuxda loo adeegsan karo (ADA) oo raacaya dhammaan xeerarka khuseeya ee dhismaha iyo badbaadada. Sidoo kale ah mid furfuran, shaqaynaya oo diiradda saaraya baahiyaha waxbarasho isagoo qaabilaya hawlaha bulshada ee la doono. Tan waxa kamid ah isbaddalo dhismaha ah oo abuuraya barxado u furfuran waxbarista iyo waxbarashada, iyo hagaajino kale oo taageeraya guusha ardayda.

**Waa maxay waxyaalaha muhiimka ah ee nashqadda cusub?**

- **Kafateeriya / Meelaha Caamka & Waddooyinka -** Meelaha caamka ah ee McDaniel waxay noqon qalbiga dugsiga cusub waxayna noqon meel dadka lagu soo dhaweeyo marka irridda wayn laga soo galo 82nd Ave. Waddooyinku waxay isku xiri doonaan dhammaan garabyada waawayn ee dhismaha iyo dhammaan saddex heer ee fasalada. Muuqaaladan nashqadeed waxay ahaayeen waxyaalaha muhiimka ah ee uu ka kooban yahay ee Kooxda Talobixinta Nashqadda ee dadwaynuhu ay doorteen.

- **Garabka Sayniska** - Shaybaadhada sayniska waxa lagu xoojin meel u dhaw xagga hore ee dugsiga waxayna muujin inay u yihiin tusaale ifaya dugsiga cusub iyaga iyo meelaha caamka ah ee irridda wayn.

- **Fanka Masraxiyadda** - Xarun muusig & tiyaar oo cusub, casrina ah ayaa u noqon doonta meel dugsiga iyo bulshada deegaankuba wax ku soo bandhigaan.

- **Khayraadka Bulshada** - Xarunta daryeelka carruurta ah, rugta caafimaadka dadwaynaha, meesha cuntada lagu qaybiyo waxay sii wadi inay u adeegaan bulshada.

- **Xarumaha Ciyaaraha** - Dhisme jimicsi oo gabi ahaanba cusub waxa uu ka koobnaan doonaa 1,700 kuraasta jimicsiga ee waawayn, kuwa yaryar, qolka culays qaadista, iyo qolka lagdinta/qoob-ka-ciyaaarka iyo garoon cagaaran oo cusub oo loogu talogalay softiboolka iyo beesboolka.

- **Waxbarashada Farsamada Mihnadda CTE** - Ardayda ku sugan dugsiga dhawaanta la cusboonaysiiyo waxay heli doonaan shaybaaro takhasus oo ku aaddan nashqadda dhijitaalka, injineerinka, robootigga, fanka dhijitaalka, baayomidhikaalka, sanam-qoridda, dhismaha, cilmiga kombiyuutarka iyo beeraha adkaysiga leh, iyo sidoo kale barxad iskaashiyeed cusub.

**Waa maxay sababta magaca looga baddalo James Madison oo looga dhigayo Dugsiga Sare ee Leodis V. McDaniel?**

Kulankii Luulyo 14 ee Guddida Waxbarashada, Dugsiyada Dadwaynaha Portland waxay sii daayeen qorshe u gogol xaaraya hannaan magaca looga baddalayo dhismayaashiisa iyo barxadaha kale. Hindaha dib loogu eegayo magacyada degmada waxa keenay degganaansho la'aanta joogtada ah ee waddanka ka jirta, oo ay Portland kamid tahay, si looga falceliyo takoorka nidaamsan ee dadka dareenkooda soo jiitay xagaagan. Dadaalka magaca looga baddalayo Madison waxa uu ka yimi ardayda laftooda.

Muddo dhawr bilood ah, Guddida Magaca-ka-Baddalka Madison waxay kaqaybgalinayeen dugsiga iyo bulshada oo dhan iyagoo u maraya dadaalo xooggan, oo ay ku soo ururiyeen ugu dhawaan 2,500 fikradaha bulshada ah, ay sameeyeen boqolaal wicitaan kuna qaateen saacado aan tiro lahayn si ay si wanaagsan uga fekeraan magaca ugu habboon ee ku habboon qiyamka (hadda ku magacaaban) C.R.E.E.D (Community, Respect, Education, Equity, Diversity) ee dugsiga.

Leodis V. McDaniel, oo ahaa arday wax ka bartay Dugsiga Sare ee Lincoln, wuxuu ahaa hoggaamiye bulshada Portland oo aad loo qaddariyo, loo jecel yahay, oo si wayn loogu dabbaaldego kaasi oo kasbaday sumcad nadiif ah markii uu ahaa maamulaha Dugsiga Sare ee Madison 1970-nadii iyo 1980-nadii. Kahor intii aanu maamule ka noqon Madison. McDaniel wuxuu ahaa mid kamid ah maamulayaasha Dugsiga Sare ee Madow ee tirada yar ee Oregon 1980-nadii loona magacaabay hoggaaminta Madison la dagaalanka isir-sooca iyo basaska. McDaniel waa ka guulaystay caqabadahan maadaama oo uu dhammaan hawlihiisa maamuleed ku saleeyey ujeedada kaliya ee ah in cid kasta caddaalad hesho. Wuxuu caan ku ahaa dabeecaddiisa naxariista leh, qosolkiisa saamaynta badan, daacadnimadiisa dhammayska ah, iyo awoodda uu u lahaa inuu si qoto dheer xiriir ula yeesho dadka oo dhan. McDaniel si aad ah ayey u yaqaaneen ardayda iyo shaqaaluhu isagoo kasbaday abaalmarino iyo mudnaano ka helay ururo bulsho oo badan oo uu gacan ka gaysatay.
Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan magaca-ka-baddalka dugsiyada fadlan booqo websaytka Magac-u-bixinta iyo Qeexidda PPS.

**Maxaa ku dhacaya McDaniel inta dhismuhu socdo**?
Baaxadda iyo xajmiga dhismaha dartii, McDaniel waa xirnaanayaa labada sano ee dhismuhu socdo. Gabi ahaanba McDaniel bulshadiisa, shaqaalihiisa iyo ardaydiisu waxay u guureen Marshall Campus oo ku yaala SE Portland. Inta dhismuhu socdo oo dhan, Marshall wuxuu si kumeel gaar ah u ahaan Dugsiga Sare ee McDaniel halkan Marshall Campus.

**Waa maxay sababta Marshall High si kumeel gaar ah loogu doortay inay isticmaalaan Franklin iyo McDaniel?**
Intii lagu jiray qorshaynta codbixinta curaarta codbixiyuhu ansixiyey, Marshall Campus waxa loo xushay inay tahay meesha ugu wanaagsan ee ay tahay inay isticmaalaan dugsiyada la dhisayo (Franklin, Grant, McDaniel iyo Benson oo isna dhawaan soo gali doona). Maadaama uu yahay xarun dugsi sare oo dhawaan la xiray, Marshall wuxuu leeyahay dhammaan barxadaha iyo kaabayaasha loo baahan yahay si uu ugu noqdo hoy kumeel gaar ah bulshooyinka dugsiyada sare ee dugsiyadooda dib-u-dhisku ka socdo. Maalgalinta ka socda Barnaamijka Curaarta 2012 & 2017 ayaa si gaar ah loogu qoondeeyey casriyeynta Marshall Campus.

**Muddo intee leeg ayey ardayda McDaniel ku sugnaan doonaan Marshall Campus?**
Shaqaalaha iyo ardayda Dugsiga Sare ee McDaniel waxay ku sugnaan doonaan Dugsiga Sare ee Marshall laga bilaabo sanad dugsiyeedka 2019-20 ilaa dhammaadka sanad dugsiyeedka 2020-21. Ardayda waxa la filayaa inay ku soo laabtaan Dugsiga Sare ee McDaniel oo si buuxda loo casriyeeyey bilawga sanad dugsiyeedka 2021.

**Sidee ayey ardayda McDaniel ku tagayaan Marshall Campus?**
Arday badan oo McDaniel ah waxay awood u yeelan isticmaalidda gaadiidka gaarka iyo ka dadwaynaha (TriMet) si ay u gaaraan kambaska Marshall oo ku yaala 3905 SE 91st Ave. Dugsiyada Dadwaynaha Portland sida caadiga ah ma siiyaan adeegga basaska jaallaha ah ee caadiga ah dugsiyada sare ee Degmada. Hase yeeshee, ardayda ku sugan xaafadaha qaar oo wakhtiga gaadiidka la sugaa uu badan yahay waxay ka helayaan nooc kaalmo ah Gaadiidka Ardayda PPS. PPS waxay abuurtay talobixin qoys oo lagu sharraxayo ikhtiyaarka gaadiidka si loo gaaro kambaska Marshall kaasi oo faahfaahsan. Fiiri Talobixinta Qoyska ee Gaadiidka Madison ee ku socda Marshall | Español | Tiếng Việt | Русский | Soomaali | 中文

**Sidoo kale booqo websaytka Waaxda Gaadiidka si aad u hesho macluumaad ku saabsan saamaynaha la xiriira COVID https://www.pps.net/Page/115**

**Sidee ardaydu u isticmaali doonaan TriMet si ay u gaaraan Marshall Campus?**
Dhammaan ardayda McDaniel waxay mutaysteen Tigidhka Gaadiidka Ardayga Dugsiga Sare ee Dugsiyada Dadwaynaha Portland. Khadka MAX Green ayaa bixiya ikhtiyaar toos ah oo degdeg ah si loo gaaro kambaska kumeel gaarka ah. Si aad wax badan uga ogaato MAX iyo dariiqyada baska markaad tagayso Marshall Campus, fiiri bogga jadwalka TriMet: *http://trimet.org/schedules/index.htm* ama, haddii aad raadinayso app-ka TriMet ee saxda ah si aad taleefanka ugu shubato, booqo halkan: http://trimet.org/apps/index.htm Barnaamijka Tigidhka Gaadiidka Ardaygu waa iskaashi ka dhexeeya TriMet, degmo dugsiyeedka iyo Magaalada Portland.

**Miyay basas helayaan hawlaha galabtii iyo kuwa manhajka ka baxsan qaarkood?**
Waaxda Gaadiidka Ardaydu waxay si dhaw ula shaqaynaysaa maamulka McDaniel si ay u siiso adeeg bas oo xaddidan xaafadaha qaar kadib soo gabagabaynta hawlaha iyo ciyaaraha galabtii.

**Waa maxay sababta dhismayaasha dugsiyada qaar loo casriyeeyey halkii laga baddali lahaa?**
Go'aanka in si buuxda loo casriyeey ama gabi ahaanba la baddalo dhisme dugsi waxay ku xiran tahay da'diisa, ahmiyaddiisa taariikheed, xaaladdiisa, ceebaha iyo xajmiga iyo baahiyaha barxadda barnaamijeed. PPS waxay leedahay dugsiyo xaafadeed oo taariikhi ah oo badan. Dhismayaasha taariikhiga ah waxa loogu dayactirayaa Curaarta Horumarinta Dhismaha Dugsiga qaab waafaqsan ku-talogalka taariikheed ee dhismaha iyo qaybaha dhismaha, iyadoo dhanka kale uu bixinayo jawiyo casri ah oo waxbaris iyo waxbarasho iyo qurxino waaraya oo aan hore u duugoobayn. Macalimiinta, shaqaalaha iyo qoysasku waxay ku lug leeyihiin qorshaynta si ay gacanta uga gaystaan ilaalinta sifooyinka goonida ah ee dugsi kasta iyo sida uu ugu milan yahay bulshooyinka ku hareeraysan.

**Waa maxay saamaynta shaqada dhismuhu ku leedahay xaafadda ku hareeraysan?**
Si aad wax badan uga ogaatid saamaynaha shaqada dhismaha fadlan **Fiiri xaashida xaqiiqda Shaqada Dhismaha Madison | Español | Tiếng Việt | Русский | Soomaali |** 中文

**Sidee xubnaha bulshada, ardayda, macallimiinta iyo qoysasku aragti ugu leeyihiin nashqadda cusub ee Dugsiga Sare ee McDaniel?**
Dugsiga Sare ee McDaniel waxa nashqaddiisa aad uga qaybqaatay bulshada waxaana kamid ahaa helidda aragtida macallimiinta iyo shaqaalaha dugsiga, Kooxda Talobixinta Nashqadda McDaniel iyo sidoo kale ardayda, qoysaska, jaararka, iyo bixiyayaasha adeegga.

Maadaama degmo dugsiyeedku ay leedahay hoolal waxbarasho oo guud iyo tilmaamo nashqadda ah, dugsi kasta wuxuu leeyahay bulsho gooni ah. Arrimaha gaarka ah waxa ku jiri kara: fursadaha iskaashiga,

adeegyada la siinayo ardayda, ahmiyadda taariikhiga ah ee dhismaha iyo isticmaalka bulshada ee xarumaha dugsiga.

Kooxda Talobixinta Nashqadda (Design Advisory Group (DAG)) waxa loo sameeyey mashruuca casriyeynta Dugsiga Sare ee McDaniel. Kooxda Talobixinta Nashqaddu waxay ka kooban tahay waalidiin, macallimiin, arday, arday hore, bixiyayaal adeeg, iyo bulshada. DAG waxa laga qaybgaliyey qorshaynta guud iyo nashqadda iyadoo loo maray samaynta nashqadda iyagoo siinaya jawaabcelin kooxda nashqadda oo fududaynaya in la gaaro bulshada oo dhan.

Marka laga tago DAG, shaqaalaha Dugsiga Sare ee McDaniel ee ka shaqanaya dhismaha -- oo ay ku jiraan maamulayaasha, macallimiinta, caawiyayaasha, xoghayayaasha, shaqaalaha nafaqada iyo ilaaliyayaasha -- ayaa ahaa qaar la beegsaday marka la eego hannaanka nashqadda. Waxay siiyeen kooxda nashqadda aragtiyo gooni ah maadaama ay yaqaanaan hawlgallada dugsiga, ardayda wax ka barta halkaasi iyo fursadaha jira ee horumar.

**Sidee Siminaarada Nashqaddu ay fursad ugu siinayaan xubnaha bulshada inay fikrad ku darsadaan?**
Siminaarada Qorshaynta Guud iyo Nashqadda Hore labadaba waxa lagu qabtay Madison-kii hore ee hadda la dhaho McDaniel High. Siminaaradan waxa ku xigay Dhacdooyin Furan halkaasi oo qorshayaasha guud iyo nashqadda hore ee la doorbiday bulshada loogu soo bandhigay. Kulamadan furan waxay xubnaha bulshada u siiyaan fursad ay si toos ah ugala qaybgalaan Kooxda Nashqadda dhanka qeexista aragtida midaysan oo dugsigooda ku aaddan.

Dadku waxay awoodayeen inay wadaan fikradahooga iyo aragiyahooga ku saabsan: Muxuu McDaniel-ka mustaqbalk u ekaan una muuqan? Waa maxay qaybaha dhismaha iyo kambaska ee shaqeeya sida wanaagsan? Waa maxay qaybaha aan u shaqayn si wanaagsan? Sidee ayuu McDaniel si wanaagsan ugu taageeri karaa ardayda iyo qoysaska? Kalfadhiyadan waxa loogu talogalay inay u saamaxaan qofkasta inuu ku darsado aragtidiisa, mudnaanihiisa, fikradihiisa iyo faallooyinkiisa gaarka ah.

**Waa ayo Kooxaha Nashqadda iyo Shaqada Dhismaha?**
Opsis Architecture wuxuu nashqadeeyey dugsiyo K-12 oo casri ah oo badan iyagoo diiradda si gaar ah u saarayey waxbarashada STE(A)M. Si ay u abuurto jawi isku xirnaan iyo u dhannaansho, Opsis waxay iskaashi la samaysay DAO Architecture si ay uga hesho aragti dheeraad ah hannaanka kaqaybgalka iyo nashqadda---DAO waa shirkad yar, oo aqoon iyo khibrad badan leh, oo MWESB aqoonsan tahay. Waa muhiim in Opsis ay ku darto koox matalaysa kala-duwanaanta iyo u dhannaanshaha Dugsiga Sare ee Madison. Kooxda The Opsis | DAO waxay rajaynayaan inay u baddalaan Dugsiga Sare ee McDaniel jawi waxbarasho oo qarniga 21aad la jaanqaadaya iyo xarun siyaabo badan ay u adeegsan karaan bulshadiisa kala-duwan, dhaqamada badan ka soo jeeda, ee qoomiyadaha badan ka kooban.

Shirkadda Portland deggan ee Fortis Construction, Inc. ayaa ah Maamulaha Shaqada Dhismaha/Qandaraaslaha Guud ee mashruuca casriyeynta McDaniel. Fortis oo la aasaasay 2003, waa shirkad ay leeyihiin shaqaale oo u go'day dhisitaanka xarumaha waxbarasho Oregon oo dhan. Kooxda Fortis waa u sharaf inay qayb ka yihiin mashruucan baddalidda bulshada iyo saamaynta uu ku yeelan doono jiilalka ardayda ee iman doona.

**Sideen wax badan uga ogaan karaa mashruuca?**
Macluumaad dheeraad ah, fadlan ku biir liiskayga dadka iimeylka loo diro: schoolmoderization@pps.net. Booqo websaytkayaga Bond Program: www.pps.net/bond ama websaytka Mashruuca McDaniel https://www.pps.net/Page/1840